

# MAXAY TAHAY TIIBISHADU?

*Warbixinta bukaanka*

## TUSMO


HORDHAC

**1** GUUD AHAAN TIIBISHADA
- 1.1 *Maxay tahay tiibishadu?*
- 1.2 *Markasta tiibishada ma laysku daartaa?*
- 1.3 *Sidee laguugu daaran karaa?*
- 1.4 *Sidee tiibishada looga hortagi karaa?*
- 1.5 *Maxay yihiin cabashooyinka tiibishada?*
- 1.6 *Sidee lagu ogaadaa tiibishada?*

**2** TIIBISHADA SAMBABADA
- 2.1 *Maxay tahay tiibishada sambabadu?*
- 2.2 *Maxaa haboon/ gudboon marka tiibishada sambabka laysku daarto?*
  - *Qufac nadiifsan/ edebsan*
  - *Isticmaalka daawada*
  - *La dhaqanka /xiriirka booqashada*
  - *Baaridda xiriirada/ asal baarid*

**3** TIIBISHADA AAN SAMBABADA AHAYN

*Maxay tahay tiibishada aan sambabada ahayn?*
- *Tiibishada qanjirada ( Gondolaariyo/ Qun)*
- *Tiibishada Kelyaha*
- *Tiibishada araxda ama tiibishada lafaha*

**4** DABIIBKA/ DAAWEYNTA
- 4.1 *Can Tiibishada si fiican ma loo daaweyn karaa?*
- 4.2 *Isbitaalka miyaa la i dhigayaa?*
- 4.3 *Daawooyinkee la helaa?*
- 4.4 *Maxay tahay in aan ka ogaado waxa khuseeya isticmaalka daawada?*
- 4.5 *Maxay tahay cabashooyinka ugu badan ee ka iman kara isticmaalka daawada?*
- 4.6 *Wanaag ayaan dareemay. Ma in aan sii liqaa daawada?*
- 4.7 *Sidee tahay daaweynta caruurta yaryar?*

**5** WARBIXIN CAADI AH
- 5.1 *Su'aalo ma qabtaa?*
- 5.2 *Maxay qabataa GGD?*
- 5.3 *Maxay qabtaan neersiska bulshadu ee GGD-da?*


KNCV TUBERCULOSISFOUNDATION
To eliminate TB

# HORUDHAC

**Dhakhtarkaagu waxa uu kuu sheegay in ay kuu bilaabmayso daaweynta/ dabiibka tiibishada (tbc). Buugan yar waxaad ka heleysaa jawaabaha su'aalaha badanaa la is weydiiyo ee ku saabsan tiibishada iyo daaweynta/ dabiibka.**

**Bilow ilaa dhamaad in aad buugan yar akhrisaa uma baahnid. Markasta warbixinta aad u baahantahay wakhtigaas ayaad ka akhrisan kartaa. Tusmada buuga ayaad ka eegan kartaa.**

## Xaqiiqda tiibishada

- Tiibishada aduunka oo dhan waa laga helaa.
- Aduunweynaha sanad walba waxaa u dhinta nus milyan dad ah tiibisho ku dhacday awgeed.
- Tiibishadu waa cudur khatar ah, laakiin daawo ayaa si fiican loogu dabiibaa.
- Tiibishada bakteeriyo ayaa sababta.
- Qofkasta tiibiidu waa ku dhici kartaa.
- Nooca ugu badan ee la arkaa waa tiibishada sambabada.
- Unugyada kale xataa waa ku dhacdaa.
- Nooc laysku daarto iyo mid aan laysku daaran waa jiraan.
- Waa muhiim in aad daawada laguu qoray (kuurada) dhamaysato.

# 1 GUUD AHAAN TIIBISHADA

*1.1 Maxay tahay tiibishadu?*
Tiibishadu waa dhaawac/ infekshan. Dhaawaca waxaa sababa bakteeriyo/ wasakh jirka gasha. Tiibiida waxaa sababay bakteeriyo tiibiiyeed. Waa dhici kartaa in aadan garanayn sida ay kuugu dhacday. Way dhici kartaa wakhti hore in ay ahayd waana dhici kartaa wakhti yar ka hor in ay dhacday. Bakteeriyadani way kugu dhex jirtaa/ nooshahay hadda. Waxaa ku haya cudurka tiibiida.

Qofkasta tiibiidu waa ku dhici kartaa, kumana xirna da'da, jinsiyada, lab iyo dhedig.

Meelkasta oo jirka ka mid ah cudurkani waa ku dhici karaa. Nooca ugu badan ee la arkaa waa tiibishada sambabada.

*Cudur-qaadid (infekshan):*
*Bacteeriyada tiibiida ayaa jirkaaga galay.*
*Cudur-qaadsiin (infekshanka)*
*Bakteeriyada tiibiida oo la qufaco.*

*1.2 Markasta tiibishada ma laysku daartaa?*
Maya, tiibishada aan tan sambabada ahayn layskuma daarto. Tiibiida sambabada waa laysu daaran karaa.

*1.3 Sidee laguugu daaran karaa?*
Tiibishada waxaa caadi ahaan markasta fidiya hawada. Marka qofka qaba tiibiida sambabada uu qufaco, bakteeriyada sambabadu banaanka ayey u soo bixi kartaa. Haddii qof kale bakteeriyadan neef ahaan u qaato, waa uu ku dhici/ qaadi karaa cudurka. Bakteeriyadani waxa ay geli kartaa sambabada ama jirka qaybihiisa kale. Badanaa jirka ayaa difaac sameeya si aanay bakteeriyadani dhib u keenin. Jirka ayaa waxa uu ku sameeyaa bakteeriyadan dabool si aanay u kaakicin. Tani waxa ay keeneysaa in bakteeriyadu iska hurudo. Dadku waa bakteeriyo wade/side. Dadkani ma jirana lagamana qaado. Sidaha cudurku waa dambe waa uu jiran karaa inta uu noolyahay ama ay nooshahay. Bakteeriyada ayaa kaakacaysa/ dhaqdhaqaaqaysa. Sidaa daraadeed waxaa dhalanaya tiibishadii. Sanado ayey qaadan kartaa ka hor inta aanan cudurku kugu dhicin. Dadka badankii ma jiradaan weligood ka bacdi marka ay qaadaan cudurka.

- *Nooca laysku daarto waxaa loogu yeeraa tiibishada furan ('open tuberculose').*
- *Nooca aan laysku daaranin waxaa loogu yeeraa tiibishada xiran ('gesloten tuberculose').*

*Tiibiidu kuuguma dhacayso:*
- *Dadka kale oo aad saxamadooda, qaadooyinkooda, fargeetooyinkooda, midiyahooda, dharkooda, buugtooda, go'yaashooda, iwm isticmaasho.*
- *Salaan gacmaha la is ruxo*
- *Jamaaca (seksueel contact)*
- *Dhiig ku gaara*

*Tiibiidu waxay kaa gaaraysaa:*
*Marka qof qaba tiibishada furan uu qufaco, hindhiso, cadhuufsado*


*1.4 Sidee tiibishada looga hortagi karaa?*
Waa muhiim in dadka qaba tiibiida sambabada kuna daaran kara dadka kale sida ugu dhaqsaha badan loo raadiyaa loona daaweeyaa. Si wanaagsan/ nadiifsan oo aad u qufacdaa waa muhiim. Nadiif qufaca wanaagsan waa qufac aad gacmahaaga afka saarayso adoo isticmaalaya fasaleetiga warqada ah lana jeesanaya ( madaxa wareejinaya).

*1.5 Maxay yihiin cabashooyinka tiibishada?*
Cabashooyinka ugu badan ee la arkaa waa:

- Daal
- Cunto xumo
- Caatow
- Xumad
- Habeen dhidid

Qofka qaba tiibishada sambabada wuu qufac badan yahay wuxuuna tufaa xaako (marmar ayadoo dhiig wadata).

*1.6 Sidee lagu ogaadaa tiibishada?*



qiimayn baarid maqaar

Tiibiida waxaa lagu ogaan karaa sidan soo socota:

- Maqaarka/ jirka oo la baaro, tan waxaa loogu yeeraa tuberculinehuidtest (mantouxtest). Maqaar baaridani waxay sheegi kartaa bakteeriyada tiibiida. Maxsuulka waxaa la qiimeeyaa 2 ilaa 3 maalmood ka bacdi. Haddii wax ka yimaadaan (reakshan/ isbedel) baarid dheeraad ah ayaa loo baahanayaa.
- Ayada oo sambabada raajo la saaro. Raajada sambabada waxaa laga arki karaa in isbedel jiro. Haddii ay dhacdo arintani waxaa la dhihi karaa tiibisho ayaa jirta.
- In shaybaar lagu baaro xaakada/ dheecaanka, kaadida ama unugyada. Jidkan waxaa si dhaqso leh loogu ogaan karaa in bakteeriyada tiibiidu jirto iyo in kale.
- Tusaale ahaan in la kobciyo xaakada/ dheecaanka, kaadida ama unuga. Bakteeriyada tiibiidu si tartiib tartiib ah ayey u bataan. Sidaa daraadeed wakhti ayey qaadanaysaa inta maxsuulka baaridan laga ogaanayo. Arintani waxay qaadataa ugu badnaan sadex bilood.

# 2 TIIBISHADA SAMBABADA

*2.1 Maxay tahay tiibishada sambabadu?*
Tiibiidu waa dhaawac ku yaala sambabada. Tan waxaa sababtay bakteeriyada tiibiida oo hawo ahaan loo qaatay fariisatayna/ degtayna sambabada. Dabadeed arintani waxay keentay dhaawac. Marmar waxaa dhici kara in sambabadaada ceelal/ hogag ku samaysmaan. Laba nooc oo tiibiida sambabada ah ayaa jira: waxaa ku hayn kara mida laysku daarto ama mida aan laysku daaran.

Marka dhaawacu weyn yahay, bakteeriya badan ayaa sii badatay. Bacteeriyadan si fudud ayaa loo qufici karaa. Sidaa daraadeed dadka kaa ag dhaw waad ku daaran kartaa. Haddii dhaawacu yaryahay, bakteeriyo yar fudud ayaad qufacaysaa daarashada aad dadka kale ku daaratаa way yartahay ama maba qaadsiin kartid.

Nooca ugu cajiibsan ee tiibiidu waa tuberculeuze pleuritis. Xab ayaa wuxuu kala dhex fadhiyaa sambabka iyo xuubkiisa. Qofka uu noocani hayaa waxaa dhiba neefta neefsashaduna xanuun ayey u keentaa. Marmar waa in la duleeliyaa si looga soo dhuuqo xabka. Tiibiida noocan ah layskuma daarto. Tiibiidan marka laysku daarto iyo marka ay qofka soo rido wakhti yar ayaa u dhexeeya. Sidaa daraadeed waxaa wanaagsan in baarid lagu sameeyo asal meesha uu ka yimid cudurkani. Sidoo kale waxaa la fiirinayaa in dad kale uu cudurku gaaray.

*2.2 Maxaa haboon/ gudboon marka tiibishada sambabka laysku daarto?*
Waa muhiim in la qaato go'aamo. Go'aamadaas oo soconaya inta cudurka aad gaarsiin karto dadka kale. Todobaadyo ka bacdi marka aad isticmaasho daawada kuma daaran/ gaarsiin kartid dadka kale cudurka

- **Qufac nadiifsan/ edebsan**

Tiibiida waxaa gaar ahaan laysku qaadsiiyaa qufaca. Qufaca hagaagsani/ nadiifsani waxa uu keenaa difaac wanaaagsan ee qaadsiinta bakteeriyada tiibiida. Nadiif qufaca wanaagsani waa qufac aad gacmahaaga afka saarayso adoo isticmaalaya fasaleetiga warqada ah lana jeesanaya ( madaxa wareejinaya). Xaaladaha qaarkood in cimaamad sanka lagu daboosho waa hagaagsantahay.



- **Isticmaalka daawada**

Fiiri bayjka 5 ee arintan khuseeya. Halkan waxaa lagu sharxayaa daawooyinka la helo, inta ay daawadaadu kuu soconayso iyo ayada isticmaalkeeda waxa ka imaanaya. Badanaa waxaa ku tilmaamaya neersiska bulshada ama caawiye kale sida aad u cuni lahayd daawada. Badanaa todobaadyo ka bacdi bilowga daawada kuma daaran/ gaarsiin kartid dadka kale cudurka.

- **La dhaqanka /xiriirka booqashada**

Dadkii aad maalin walba la kulmi jirtay cudurkan ka hor (waayeel iyo caruur) waad sii joogteyn kartaa kulankaas. Ha ka leexan ayaguna yaysan kaa leexan. Waxaa mihiim ah in aad xadadado xiriirka dadka kale. Gaar ahaan waxaa fiican in aadan joogin goob dad badani joogaan. Talo ma aha in aad laxiriirto/ u dhawaato caruurta aad u yar iyo dhalaanka/ sebiga inta wakhtigani socdo. Dadka booqashada kuugu imaanaya sida neersisks bulshada, waxaa sanka ugu xiran cimaamad difaac ahaan.


- **Isbitaalka**

Marmar waxaa loo bahanayaa in isbitaal lagu dhigo. Isbitaal kast waxa uu leeyahay shuruuc khusaysa daaweynta dadka tiibishada qaba. Waa muhiim in aad sharciyadaas ilaaliso.

- **Baaridda xiriirada/ asal baarid**

Dadka aad wakhtiyadii dambe xiriirka badan la lahayd tiibisho ayaa laga baarayaa. Tan waxaa lagu magacaabaa baarida xiriirada. Neersiska bulshada ee GGD-da ayaa kaaga warbixinaya wixii arintan khuseeya su'aalana kaa weydiin doona dadkii aad wakhtigii la soo dhaafay xiriirka la lahayd (sidoo kale eeg buuga yar ee 'Baaridda xiriirada'/ Contactonderzoek).
Sidoo kale xiriirada qofka jirani sameeyo waa la baarayaa sida waafaqsan xeerka (ringprincipe). Tan macnaheedu waxa weeye in la baaro marka hore xiriirka ugu sokeeya. Haddii xiriiradaas infekshan badan lagu arko, baaridda waxaa lagu balaarinayaa xiriirada yaryar ee fog. Marmarka qaarkood waxaa baarida laga ogaan karaa qofka ku gaarsiiyey cudurka. Ujeedadu waa in laga hortago in dad badan cudurku gaaro.
GGd-du si amaan leh ayey u ilaalin doontaa macluumaadkaaga iyo kuwa dadka kaleba.

Xeerka xiriir baaridda




# 3 TIIBISHADA AAN SAMBABADA AHAYN

*Maxay tahay tiibishada aan sambabada ahayn?*
Tiibiida aan sambabada ahayn waa bakteeriyada tbc-da oo xididada dhiiga iyo kuwa dheecaanka raaca oo gala unugyada kale ee jirka. Bakteeriyadani waxay halkaa ku sababtay hurgun/ nabar. Meelaha lagu arko waa: Qanjirada, kalagoysyada, kelyaha, maskaxda, araxda, lafaha, minka ilmuhu ku koro, minka ugxantu ku samaysanto, unugga shahwada raggu ku samaysanto, xiidmaha, caloosha. Badanaa waa adagtahay in la ogaado tiibiida aan sambabada ahayn. Tiibishada noocan ah layskuma daarto. Sadexda nooc ee badanaa la arko ee aan ahayn tiibiida sambabada ayaa si kooban loo sharxayaa.

- **Tiibishada qanjirada ( Gondolaariyo/ Qun)**

Tiibiida qanjirada/ qumanka (gondalaariyo) waxay gashaa dhuunta, kilkilaha ama bisqinta. Qanjiradu waa hurgumayaan bararayaanna, marmarna waxaa ka imaanaya dheecaan. Haday macquul tahay waad ku dabooli kartaa nabarka kaarso. Inta daawadu socoto marmar qanjiradu wakhti kooban ayey weynaanayaan. Arintan waxba ha ka welwelin.

- **Tiibishada Kelyaha**

Tiibiida kelyuhu waxay ku dhalataa iyada oo bakteeriyadu fiday degtayna kelyaha. Tiibiida kelyuhu sanado ayey jirkaaga ku jiri kartaa ayada oo aanan wax dhibaato ah keenin. Mar dambe tiibiida kelyuhu dhibaato wey sababi kartaa, kuwaasoo la moodo infekshan kaadimareen. Dhibka kelyaha iyo kaadi haysta kaa haya waxaa cad in ay sababtay bakteeriyada tiibiida. Marmarka qaarkood bakteeriyada waxaa laga arki karaa kaadida.

- **Tiibishada araxda ama tiibishada lafaha**

Tiibiida araxdu waxay ku dhalataa ayada oo bakteeriyada tiibiidu degto agagaarka araxda ee dhabarka. Lafta ayaa dhaawacanta. Badanaa labo ama sadex lafaha araxda ah ayaa jajaba/ dhaawacma. Cabashooyinka ugu badan ee laga sheegtaa waa: dhabar xanuun, dhaqdhaqaaqa/ xarakaadka oo yaraada iyo qaabka dhabarka oo isbedela. Si balaaran oo baaritaan loo sameeyo ayaa tiibiida noocan ah lagu ogaan karaa. Qaliin iyo/ ama dhabarka oo si gaar ahaaneed loo duubo waa lama huraan.

# 4 DABIIBKA/ DAAWEYNTA

*4.1 Tiibishada si fiican ma loo daaweyn karaa?*
Nooc kasta oo tiibiida ka mid ah daawo ayaa si wanaagsan loogu dabiibi karaa (haddii aad daawada ku canaanyooto, dabiibku aad ayuu u dhib badnaanayaa).

*4.2 Isbitaalka miyaa la i dhigayaa?*
Badanaa arintan looma baahdo, laakiin marmar waa lama huraan in isbitaal lagu dhigo. Tan waa loo baahnaan karaa si daawada laguu qabadsiiyo. Waana lagaa caawin doonaa sida

aad u qaadan lahayd daawada. In isbitaalka lagu dhigo waa loo baahnaan karaa, cudur kale oo ku haya awgiis. Sababta kale waa ahaan kartaa in xaaladaada nololeed ayna ku haboonayn inaad fiicnaato. Nooca tiibiida ee khatarta ah ama cakiraad/ dhib timaada waa loogu baahnaan karaa iyana in isbitaal lagu dhigo.

### *4.3 Daawooyinkee la helaa?*

Daawooyin kala nooc ah ayaa isku mar lagu siinayaa. Sidan waxaa loo yeelayaa in si dhaqso leh, buuxda loo baabi'iyo bakteeriyada. Wajiga koowaad ee daaweynta waxaa lagu siinayaa afar (marmar sadex) nooc oo kala duwan oo daawo ah. Wajiga koowaad wuxuu socdaa qiyaastii sadex bilood waxaana dhimanaya qayb weyn/ badan oo bakteeriyada ah. Qayb yar oo bakteeriyada ah waa adagtahay in la dilo. Sidaa daraadeed waxaa wajiga labaad lagu siinayaa ugu yaraan laba nooc oo daawo ah. Bukaanka qaarkiis waxaa si dhaqso leh looga caawinayaa sida ay u qaadan lahaayeen daawada.

Daawooyinka ugu muhiimsan ee tiibiida lagu daaweeyaa waa:
- Isoniazide
- Rifampicine
- Pyrazinamide
- Ethambutol
- Rifinah (Isoniazide iyo Rifampicine oo la isku daray)

Badanaa fitamiin B6 (Pyridoxine) ayaa daawada lagu daraa. Hal ama dhowr daawooyin ah haday bakteeriyada wax ka dhimi waayaan waxaa marmarka qaarkood lagu sii daraa daawo ama daawooyin kale.

### *4.4 Maxay tahay in aan ka ogaado waxa khuseeya isticmaalka daawada?*

- Dabiibka waxa uu soconayaa 6 bilood ugu yaraan. Marmar waa in aad daawada isticmaashaa in ka badan 6 bilood. Tani waxay ku xiran tahay khatarta ama baahsanaanta cudurka. Bakteeriyada tbc-du waa adag tahay sida lagu dilo. Sidaa daraadeed waa muhiim in aad qaadato daawada maalinkasta ilaa inta uu socdo wakhtiga dabiibka uu dhakhtarku kuu qoray. Haddii aan tani dhicin bakteeriyada waxba ka dhimi maayaan hal ama dhowr daawadaan ah. Waa macquul in aad daawada qaadato 3 jeer todobaadkiiba ayada oo balan la isla meeldhigay la raacayo.
- Kuuradan/ dabiibkan lama ogola in la kala joojiyo (la istaajiyo hadana la qaato). Samee in aad goor hore hesho warqad kale oo cusub oo ah daawo dhakhtarku kuu qoray. U foojignow in aad hesho qiyaasta saxda ah ee daawada. Haddii aad shakido la xiriir neesiska GGD-da.
- Waa waajib in aad qaadato daawada qiyaasta laguu qoray wakhti go'an. Gooso/ u gooso wakhti kugu haboon adiga, tusaale ahaan marka aad soo toosto ama marka aad seexanayso ama xilliga cashada. Tani waa kuu fududahay in aad xasuusnaato. Shayga daawadu ku jirto waa caawiye ku fiican arintan.
- Ma fiicna in aad cunto daawada adoo gaajaysan. Sidaa daraadeed wax cun marka hore inta aadan daawada qaadan.
- Ku xafid daawada baaakadka lagugu siiyay, markaa waa la garan/ aqoonsan karaa in ay daawo tahay.
- Uurka ama naas nuujinta iyo daawooyinku waxba isuma dhimaan.
- Ha bedelin daawadaada adigu. Kala hadal arintan dhakhtarka ku daaweynaya.
- Ha isticmaalin aalkolo inta/ wakhtiga isticmaalka daawadu kuu socdo. Isku darkani wuxuu sababi karaa beerka oo boogooba.
- Cab cabitaan kafaayo ah/ filaansho leh.
- Waa muhiim in aad dhakhtarkaaga u sheegto in aad daawooyin kale isticmaasho iyo in kale (tusaale ahaan, kiniiniga ilmaha lagu joojiyo, daawada wadnaha, cudurka sonkorta, walxaha maandooriyaha ah (methadon), iwm). Qiyaasta daawada waa macquul in la bedelo ama la hakiyo.

### *4.5 Maxay tahay cabashooyinka ugu badan ee ka iman kara isticmaalka daawada?*

Nasiib wanaag dadka badankii daawadu dhibaato uma keento. Ha ahaatee waa dhici kartaa in dhibaato kaaga timaado isticmaalka daawada. Sidaa daraadeed waa muhiim in aad la xiriirto dhakhtarka ku daaweynaya ama neersiska ku caawinaya.

*Cabashooyinka ugu badan ee yimaadaa waa:*
- *Daal*
- *Furuuruc*
- *Kaadida, saxarada, dhididka, ilmada oo jaale guduud xigeen ah. Guduudkani waa dhaawici karaa indhaha qaybtooda araga. Laakiin wax kale oo dhib ah ma keento.*
- *Lalabbo*
- *Calool xanuun*
- *Madax xanuun*
- *Kalagoysyada oo xanuuna*
- *Aragtida oo xumaata, midabada oo isku darsama*
- *Gacmaha iyo lugaha oo kabaabyooda*
- *Dhug la'aan/ wax u fiirsi la'aan*
- *Beer boogow/ beer barar*


Akhriso sidoo kale warqada daawada la socota. Haddii dhibaatooyin kale kaaga yimaadaan isticmaalka daawada, la xiriir dhakhtarka ku daaweynaya ama neersiska.

### *4.6 Wanaag ayaan dareemay. Ma in aan sii liqaa daawada?*

Haa! Aad ayey muhiim u tahay in aadan joojinin daawada: ha joojin xataa hadaad wanaag dareentay.
Weli bakteeriyada tbc-da oo badan ayaa jirkaaga ku jira. Mana ogaanaysid. Haddii aad joojiso liqitaanta daawada bakteeriyadu waa ay sii badanaysaa. Sidaa daraadeed mar dambe ayaad hadana jiranaysaa. Tiibiidu waa adkaanaysaa markaa daaweynteedu.

*4.7 Sidee tahay daaweynta caruurta yaryar?*
Tiibiida caruurta ku dhacdaa si fiican ayaa loo daaweyn karaa. Saqiirka iyo caruurta yaryar waxaa loo siin karaa daawada iyadoo sharoobo ah ama budo ah. Daawada waxaa lagu dari/ labi karaa caanaha, mushaarida iyo cuntada. Waa lagula fiirin doonaa sida ku fiican cunugaaga. Haddii cunugaagu dhibaatooyin uga yimaadaan isticmaalka daawada waa muhiim in aad la xiriirto dhakhtarka ku daaweynaya ama neersiska.







# 5 WARBIXIN CAADI AH

*5.1 Su'aalo ma qabtaa?*
La xiriir dhakhtarka ku daaweeya ama neersiska ku caawiya haddii aad:

- Dhib kaaga yimaado isticmaalka daawooyinka
- Daaweynta/ dabiibka dhib kaaga yimaado
- Ka shakidid daawada in ay tahay tii saxda ahayd iyo in kale
- Su'aalo qabto khuseeya tiibiida

*5.2 Maxay qabataa GGD?*
Dhakhtarka ku daaweynaya waxaa waajib sharci ah ku ah in uu wargeliyo dhakhaatiirta GGD-da iyo neersiska in aad qabto tiibii. GGD-du (laanta la dagaalanka tbc-da) waxay daaweysaa oo caawisaa/ hagtaa dadka cudurka tiibiida qaba. Sidoo kale GGD-du waxay isku daydaa in ay raadiso dadka cudurka lagu daartay. Arintan waxaa lagu magacaabaa baaridda xiriirka. Intaa waxaa dheer in GGD-du talaasho caruurta kuwa u baahan BCG (talaalka tiibiida). Dadka u safra dalalka tiibiidu ka jirto waxay GGD-da ka heli karaan in laga baaro tbc-da ama ka qaadan karaan talaalka tbc-da BCG ( eeg buuga warbixinta: tiibiida, safarada Yurubta Bari, Afrika, Aasiya, Ameerikada Dhexe iyo mida Koonfureed).

*5.3 Maxay qabtaan neersiska bulshadu ee GGD-da?*
Dad badan markii lagu sheego ''tiibiida'' waa qaracmaan. Caawimaad/ hagid wanaagsan markaa waa lama huraan. Caawimaadan/ hagidan waxaa ka heleysaa neersiska bulshada ee GGD-da. Neersiska bulshadu waxa ay sida ugu dhaqsaha badan kuugu imaanayaan guriga ama kaa soo raadinayaa isbitaalka. Qofkan ayaa kuu sharxi doona waxa ay tahay tiibiidu. Waxaa kale oo lagaa caawin doonaa sidii aad u cuni/ isticmaali lahayd daawooyinka. Badanaa maalin walba waa lagula xiriirayaa ama siday tahay balantu sadex jeer todobaadkii halkaas oo ay daawo kugu siin doonaan neersiska bulshadu ama caawiye kale. Badanaa waa waajib in aad si joogto ah u timaado GGD-da, si lagaaga caawiyo sidii aad daawada u liqi/ qaadan lahayd ( la socodka tooska ah ee daaweynta).




Waxaa kale oo qofkani ku weydiinayaa su'aalo ku saabsan dadkii aad xiriirka la lahayd xilliyadii la soo dhaafay. Haddii qof laga helo tiibiida sambabada, markasta waa loo baahanayaa in baarid lagu sameeyo xiriirada/ baaridda xiriirada. Si la isula meel dhigo qofka la baarayo iyo qofka aan la baarayn adiga iyo neersiska bulshada ayaa magacyada dadkaa isla qori doona. Badanaa waxaa laga bilaabayaa dadka kuugu dhow, kuwa aad xiriirkii ugu badnaa la samaysay. Haddii kooxdan laga helo dad cudurka lagu daartay, baaritaanka waa la balaarin karaa. Waxaa kale oo la fiirinayaa qofka adiga cudurka kugu daartay. Tan waxaa lagu magacaabaa asal baarid. Xataa haddii adiga ( ama cunugaagu) aydan qaadsiin karin dadka kale cudurka, waa loo baahnaan karaa in dadka kaa ag dhow la baaro. Arintan waxaa lagu ogaanayaa in dad badan cudurka lagu daartay iyo in kale. GGD-du macluumaadka si aamin leh ayey u ilaalin doontaa.

KNCV
TUBERCULOSISFOUNDATION
To eliminate TB

www.tuberculose.nl
The Hague, The Netherlands

PatientSOM 11-2017